SMITTSKYDDSBLAD

Patientinformation

Tuberkulos

Översättning till somaliska

Version 2022-04-11

# Qaaxo, macluumaadka bukaan socodka

**Marka aan daawaada ka hortegeysa la bixinayn. Warqad ku saabsan macluumaad khuseeya dhakhaatiirta xakamaysa cudurada faafa**

**Waa maxay sababta aad adigu u heshay macluumaadkan?**
Waxaad qabtaa ama lagaaga shakisan yahay inaad qabtid cudurka qaaxada oo aad u baahan tahay daaweyn. warqaddam waxaa ku yaala macluumaad ku saabsan qaaxada, sida loo daweeyo cudurka iyo waxaad u baahan tahay inaad sameyso.

**Waa maxay qaaxadu?**
Qaaxadu (waxa sidoo kale loo yaqaan TBC ama TB) waa cudur la kala qaado oo ay keento bakteeriyada, *Mycobacterium tuberculosis*. Waxay badanaa keentaa cudurka ku dhaca sambabada, iyo xitaa qaybaha kale ee jirka, sida qanjidhada, kiiska sambabada, lafaha, maskaxda ama kelyaha ayuu ku dhicikaraa. Calaamadaha cudurku waxay inta badan soo baxaan muddo dheer kadib cudurka (bilo ama sannado). Carruurta yaryar ama dadka uu nidaamka difaaca jirkoodu daciifka yahay, cudurku si dhakhso ah ayuu u badan karaa marmarka qaarkoodna aad ayuu ugu xumaadaa.

**Sidee qaaxada lagu kala qaadaa?**
Cudurka waxaa laga qaadaa dadka qaba qaaxada sambabada. Bakteeriyada waxay ku faafi kartaa hawada gudaha marka aad qufacdo oo qof kale uu nuugo dhibcaha yaryar ee bakteeriyada. Qaaxada waxaa lagu kala qaadaa inta badan xiriirka dhow iyo mid dheer oo lala yeesho qofka jirran. Sidaa darteed, dadka isku qoyska ah ayaa inta badan uu ku dhacaa cudurku. Waalidiintu waxay ku daaran karaan carruurtooda, iyo xitaa saaxiibada ay isku dhow yihiin. Waxa aan caadi ahay in qof muddo gaaban gudaheed ama kulamo ku meel gaar ah lagu daarto cudurka, tusaale ahaan goobta shaqada ama iskuulka.

**Sidee lagu ogaan karaa inuu qofku qabo qaaxada?**
Dhibaatooyinka caadiga waxaa ka mid ah miisaan qofka oo yaraada, qufac soconaya in ka badan 3 toddobaad, dhidid habeenkii iyo qandho. Dhibaatooyinku ama cudurku wuxuu ku saabsan yahay halka ay jirka bakteeriyada qaaxadu kaga jirto. Calaamadaha kale waxaa ka mid noqon kara barar (qaaxada qanjidhada) ama xanuun (qaaxada lafaha ama caloosha). Calaamadaha qaaxada dadku way ku kala duwanaan karaan iyadoo ay ku xiran tahay muddada uu qofku jiranaa – iyadoo aanay ka muuqan wax calaamad ah dadka qaarkood qaarna ay aad ugu jiradaan cudurka.

**Intee in leeg ayaa qaaxada la isku daartaa?**
Dadka qaba qaaxada sambabada ee bakteeriyadooda laga helo tijaabada candhuufta ay soo tufaan, aad ayey dadka kale ugu daaran karaan inta aan daawada loo bilaabin. Ku daarashadoodu si degdeg ah ayey u yaraanaysaa toddobaadyada ugu horreeya inta ay daawada qaadanayaan. Dadka ay qaaxadu ka gasho meel aan ahayn sambabada lagama qaadikaro cudurka. Carruurta yaryar ee qaba qaaxada weligood lagama qaadikaro. Qaaxada laguma kala qaado dharka ama waxyaabaha kale. Cudurku waa dhif iyo naadir in marka dibadda la joogo lakala qaado.

**Ma takharbaa qaaxadu?**
Haddii aan la daaweynin qaaxada bakteeriyadu way faafi kartaa oo waxay u weerari kartaa xubnaha kale. Qaaxada aan la daweynin waxay u horseedi kartaa dhaawacyo halis ah mararka qaarkoodna nafta halis gelisa. Carruurta yaryar iyo dadka nidaamka difaaca jirkoodu daciifka yahay waxay si gaar ah khatar ugu jiraan inay si xun ugu jiradaan qaaxada.

**Sidee loo daaweeyaa qaaxada?**
Qaaxada waxa lagu daweeyaa dawooyin dila bakteeriyada keenta cudurka. Daawadu waa mid wakhti dheer socota waxayna socotaa bilo badan. Aad bay muhiim u tahay in la raaco daawooyinka uu dhakhtarkaagu ku siiyo. Daawooyinka qaar waa in la qaataa marka ay calooshu madhan tahay (badanaa hal saac kahor quraacda). Sidoo kale waa muhiim inaad qaadato kiniinada daawooyinkaaga. Raac tilmaamaha dhakhtarkaaga. Haddii daawooyinka aan si joogto ah loo qaadan, markaa daawooyinku bakteeriyada ma dilayaan kadibna cudurka ayaa aad u adkaanaya in la daweeyo. Daawooyinka qaaxadu waa lacag la'aan, iyo sidoo kale booqashooyinka daryeel ee dabagalka.

**Raad raaca cudurka – waa maxay macnihiisu?**
Aad bay muhiim u tahay in la helo dadka qaba qaaxada si ay u helaan daweyn, qayb ahaan si loo yareeyo khatarta dhaawaca (kor eeg), qayb ahaana si aanu infekshanku ugu faafin dadka kale. Sidaa daraadeed qofka qaaxada qaba waa inuu u sheegaa dadkii uu sida dhow ula noolaa ama u la kulmay iyo cidda qaadsiisay ama laga yaabo inuu isagu qaadsiiyey. Qofku cudurka wuu qaadi karaa laakiin khasab ma aha inuu u jirrado cudurka.

**Qaaxadu waxay ka mid tahay sharciga cudurada faafa – waa maxay macnaheedu?**
Marka aad qaado cudurka qaaxada, waa inaad noolaataa si aadan dadka kale halis u gelin.

Qofka qaba, ama lagaga shakisan yahay inuu qabo qaaxo, **wuxuu ku khasban yahay inuu raacaa xeerarka dhaqanka** ee uu ku siinayo dhakhtarkiisu:

- Qofka qaba qaaxada la kala qaado,
    - wuxuu ku khasbanaan karaa in lagu daryeelo cusbitaalka muddo wakhti ah
    - in aan loo ogolayn inuu aado shaqada, dugsiga ama hawlaha wakhtiga firaaqada ilaa uu daawooyinka qaato oo aanu cudurka lahayn oo uu dhakhtarkiisu u sheegayo in aanu dadka kale qaadsiin karin.
- Waa inaad soo laabataa haddii dhakhtarkaagu kuu sheego inaad dib u soo laabato.
- Haddii aad guurto, waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga.
- Waad ku khasban tahay inaad ka qaybqaadato raad raaca cudurka

Haddii laguu sheego xeer aad u malaynayso inuu khaldan yahay, waxaad la xidhiidhi kartaa dhakhtarka qaabilsan cudurada faafa ee gobolkaaga.

**Miyaad rabtaa inaad ogaato warbixin intaa ka badan?**
Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaaxada waxaad ka heli kartaa halkan
www.1177.se
www.folkhalsomyndigheten.se

**Warbixinta xiriirka (Kontaktuppgifter)**

Magaca qaybta qaabilaadda *(Namn på mottagningen)*

…………………………………………………………………………….

Waad la kulantay *(Du har träffat)*

………………………………………………………...……… Dhakhtarka *(Läkare)*

……………………………………………………………….. Kalkaaliso caafimaad *(Sjuksköterska)*

Lambarka telefoonka/wakhtiga telefoonka ee qaybta qaabilaadda
*(Telefonnummer/telefontid till mottagningen)*

……………………………………………………………..